Erayga iyo Maanta Somtwt 0325

KOBOCA

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa ee Erayga iyo Maanta, oo aad ka maqashaan saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **'KOBOCA'.**

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda Erayga iyo Maanta. Waxaana waxbariddan isku soo dubbariday wadaadka la yiraahdo Doug Schroder. Sii dhegayso barnaamijka saaxiib marka aynu mawduuca kore ee ku saabsan **'KOBOCA'**oo aynu halkan idiinku lafa-guri doonno aad maqli doonto.

SONG: HAYE AAN AMMAANNO

Waxaan rajaynayaa inaad ku raaxaysanayso dhegaysiga Idaacadda Erayga iyo Maanta dal kastoo aad ka joogto dunida iyo luuqad kastoo ku hadashaba, iyo inaad dareemayso in Barnaamijyada Erayga iyo Maanta si hagaagsan laydiinku sharraxay. Taasina waa ujeeddada Idaacadda Erayga Iyo maanta, ujeeddaduna waxay tahay in faham buuxa laydina siiyo Kitaabka Qoduuska ah, khaasatan in si tafaftiran laydiinku sharroxo waxa Ciise Masiix dhab ahaan uu yahay, oo ah inuu yahay Sayidka iyo Badbaadiyahaaga, iyo wiilka Ilaah oo dunida u yimid si uu kuu badbaadiyo oo kuu siiyo Nolosha Daa'imka ah.

Taasina waa yoolka Hay'addan Erayga iyo Maanta. Waxaan markaa jeclaan lahaa inaan maanta kula wadaago weedh ama aayadda ugu dambaysa ee

Warqaddii labaad ee rasuul Butros u diray masiixiyiinta kaniisaddii ugu horraysay sida ku qoran la Warqaddan labaad 3:18, oo leh:

“Laakiinse ku kora nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix. Isaga ammaanu ha u ahaato haatan iyo weligeedba. Aamiin.”

Haddaba, si wanaagsan ayuu hadalkii ugu dhammeeyey warqaddan masiixiyiintii qarnigiisa noolayd, wuxuuna ka doonayey inay ku koraan nimcada iyo aqoonta Sayidkeenna, iyo Badbaadiyaheenna Ciise Masiix. War maxay ahayd rajo caaqibo leh tan uu ka lahaa masiixiyiinta qarnigiisii! Innagana sidaa si la mid ah ayaan idiin rajaynaynaa inaad ku kori doontaan Nimcada Ilaah.

Waxaan kaloo idiin rajaynayaa inaad fahamtaan jacaylka Ilaah kuu hayo iyo saamaxaadda iyo aqoonta khusaysa sidaad ugu noolaan lahayd nolosha laga filaayo qof masiixi ah, iyo sidaad ula macaamilayso xaaladaha ku qabsada iyo inaad kala garato waxa qumman iyo waxa khaldan iyo inaad go’aan ka gaarto sidii aad Ilaah u milicsan lahayd.

Haddaba, Qirashada Iimaanka ee dhallinyarada, marka la eego rumaysadka masiixinnimada, ayaa waxaa jira dhaqamo kiniisaduhu ku kala duwan yihiin. Waa markhaatifur ay ardadan dadka hortiisa kaga marag kacayaan rumaysadkooda Masiixa. Waxaana loo yaqaan “Confirmation” ama in qofka la xaqiiqsaday inuu yahay qof masiixi ah. Waxay xaqijinayaan rumaysadkii lagu makhuuriyey iyo inay caddeeyaan in wax la baray oo ay ku koreen Masiixa ilaa ay soo gaareen heer ay iyagu go’aamo

qaadan karaan iyo inay ka markhaati kacaan rumaysadka ay ku qabaan Ciise Masiix. Maalin baa waxaa dhacday markii la gaaray toddobaadka la xaqiijin lahaa ardaydan la soo baray kitaabka, ayaan go'aansaday inaan masaal muuqda wax ku baro, si aan iimaanka ugu sii adkeeyo. Markaasina, waxaan u soo qaaday laamo qoyan, oo ah masaal u taagan calaamad matalaysa rumaysadkooda.

Waxaan ku iri, "Ushan dhirta ah waa sidiinna oo kale, oo waxay ka soo bilaabatay mir dhulka lagu beeray oo aad u yar, laakiin xoog badan. Si la mid sidii rumaysadka aad aaminsan tihiin horey laydiinku tallaalay, ha ahaado waalid, ama qof qoyska ka mid ah, ama qof aad ka daawateen tvga oo ka hadlayey Masiixa uu idinku tallaalay e. Haddaba, mirtii rumaysadkiinna waa laydinku beeray, oo qof baa idinku talaalay.

Wuxuu qofkaasi idinla jeclaystay inuu idin soo gaarsiiyo farriinta nabaadiinada ee laga helo Masiixa."

Anigoo hadalkaygii sii wata ayaan ku iri: "Waxaase kiniisaddeenna dhaqan u ah in mirta rumaysadka laydinku tallaalo wakhtiga aad carruurta tihiin ee laydin makhuuriyey, dabeetana waad ku koraysaan oo ku dhismaysaan. Ciise, sida ku qoran Injiilka sida Matayos u qoray 28, wuxuu leeyahay: **"Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga."**

Haddaba, haddaan qisada ku soo noqdo, Wax weyn bay Masiixa u tahay in xer iyo xawaariyiin laga dhigo dadka, oo ay sidiisa oo kale noqdaan. Laba sibaa haddaba taas lagu sameeyaa, waana in qofka wax la baro,

oo la raaciyo raadka Masiixa. Waxaan rumaysanahay in qofka markii uu dhallaan yahay la makhuuriyo, oo dabeetana wax labaro intuu korayo. Waxaase jira dad iyagoo waaweyn hadalka aqbalay, qofkaas oo kale wax baa la barayaa, waana la makhuurinayaa si loo xaqiijiyo rumaysadkiisa. Waa hannaan qurux badan, oo labada nidaam kii aad martaba, waxaad noqonaysaa qof raacsan Masiixa.

Marka ay sidaa tahay, dhalinyaradaas haysata usha laanta qoyan, waxaa la xusuusinayaa in rumaysadkooda lagu habeeyey laguna soo koriyey. Ma ahan sida sheey la mid ah caag ama qolof aan koraynin. Waana inay dhowraan, haddii kale rumaysadkoodu wuu dhimanayaa. Waxaa la mid ah rumaysadkeenna, maaddaama uu yahay wax aan la arki karinna, waxay inala noqotaa inaanu baxnaano u baahnayn. Runtuse waxay tahay, in rumaysadku u baahan yahay in la dhowro, la nafaqeeyo oo lagu koriyo Hadallada Ilaah.

Bal aan figrad kaa siiyo sida qofka masiixiga ah ay tahay inuu u koro. Qofka koraya ee masiixiga ah wuxuu ku xiran yahay Hadallada Ilaah ee la soo gaarsiiyo, amase kitaabkooda aayey akhrisan karaan, amase waxay ka daalacan karaan taleefankooda gacanta ee casriga ah, oo ay soo dejisan karaan, ama downloadgaraysan karaan.

Qofka korriimada leh ee masiixiga ah waxaa lagu gartaa cibaadaysi joogta ah iyo ku xirnaanta Ilaah. Mararka qaar, adiga kelidaa ayaa niyad ahaan cibaadaysan kara, oo Ilaah ammaani kara. Waxaase rajadu tahay inay jiraan masiixiyiin kale oo aad Ilaah isla wada caabuddaan oo aad

samaysataan jameeco muuminiin ah si aad u wada cibaadaysataan. Qofka masiixiga ah ee koraya waxaa lagu yaqaan markhaatifurka. Waxaan u markhaati furnaa Ilaah, oo waxaan ka hadalnaa rumaysadkeenna. Masiixiyiinta koraysa, waa dad gaamuray oo ku koraya slaadda, mana ahan kuwo si jilicsan u tukada.
Inta salaadda lagu jirana, Ilaah bay si daahfurnaan leh ula hadlaan iyagoo qiranaya waxa qalbigooda ku jira, sida murugo, iyo caloolxumo la soo daristay, iyo haddii khalad jiro. Mararka qaarna kuweena cibaadada leh waxaan nahay dad xamaasadaysan, oo Ilaah ammaana. Qofka masiixiga ah ee gaamuray sadaqo ayuu Ilaah dartii u bixiyaa si loogu kaalmeeyo wacdiska, iyo faafitaanka Injiilku ku sii faafaya dunida.
Taasina waa calaamad muujinaysa in rumaysadka masiixinnimada sii kobcayo, waxaan rajaynayaa in adiga dhegaysanaya idaacaddana aad ka mid tahay kuwa cibaadada leh. Haddii aad rumaysatay Ciise, waa wax wanaagsan! Mirta masiixinimada waa kugu jirtaa, waxaana bilaabanaya koritaan badan, iyo arrimo cajiib ah oo dareen wacan iyo farxadba leh. Waase inaan la illaawin in rumaysadkeennu u baahan yahay baxnaano, waana in lagu dhegganaado rumaysadka sidaan idiin soo sheegay. Maahan intaad bilowdo safarka rumaysadka haddana aad joojiso. Tusaale ahaan, waxaa gurigayga ku talaalay saddex geed oo aan waraabiyo, oo mar waliba ka taxadaro. Waxaan ku wareejiyay cagaar si ayan dadku ugu joogsan, maaddaama ay aad u yar yihiin oon la arki karin. Markii qorraxdu ay kululaato waan

waraabiyaa si saddexda geed aysan u qalalin. Ujeeddaduna waa inaan difaaco iyaga si ay ku koraan. Ugu dambaynta way kori doonaan oo xoog bay yeelan doonaan sida geedaha kale, iimana baahan doonaan. Sidaa si la'eg xiriirka aad Ilaah la leedahay, waxaa u horreeya rumaysadkaaga, markaa oo keliya ayaa koboca xagga ruuxu bilaabanayaa.

Haddaba, waan ogsoon nahay oo waxaa laynaga abuuray aragga Ilaah, oo waxaan nahay ruux waddan leh, dareenkeennana meelo badan buu ku sii jeedaa, sida qoys kaalmo u baahan, haddaad shaqayso iyo haddaad arday tahayba.

Inkastoo taasi ay muhiim tahay oo qoyska xil kaa saaran yahay, haddana ahmiyadda ugu weyn waxay tahay inaad joogtayso oo ku korto rumaysadka Ciise Masiix. Waana asbaabta rasuul Butros u leeyahay, sida ku qoran 2 Butros 3:18, **"Laakiinse ku kora nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix."**

Waa inaynaan dib-u-gurasho samaynin, oo aynaan rumaysadka ka dhicin. Dhirtu waxay u baahan tahay daryeel, waana sababta ardaydan qirashada samaynaysa, loo tusay haddaanay laanta dhirta ah helin daryeel inay qalalayso. Waxaa la mid ah iimaanka oo haddaynaan waraabinin, oo ilaalinin oo aynaan akhrisanin Hadallada Ilaah, oo aynaan Ilaah baryin, oo aynaan u dabcin in Ruuxa Ilaah ina dhiso, Iimaankeenu wuu wiiqmayaa, taasna waa in laga feejignaado.

Rumaysadku wax ishu qabato maahan oo haddii aynu yara mashquulka, waan ilaawaynaa baxnaanada rumaysadkeenna. Balse maahan inaan ka mashquulno

iimaanka ama waxaan aaminsan nahay, balse waa in aan ku dhex jirno, oo dhisno. Waxaan xusuustaa wadaadkii Bawlos ahaa ee kiniisaddan oo oran jiray:

"Laba jid baa kuu furan, inaad hore u socoto iyo inaad gadaal u socoto, wax u dhexeeya ma leh. Haddaba, waa inaad Ilaah ku korto, ama in iimaankaagu nuxuuso." Waxaan idinku adkaynayaa haddii uu jiro qof dib u socod ah oo aad taqaanno, ama adigaba aad wakhti dheer ka ambatay dariiqa, waa wakhtigii Ilaah loo soo noqon lahaa, la raadin lahaa fursad mar kale Ilaah dib loogu soo laabto. Masiixiyiinta furfuran ayey la tahay in toobadkeen un ku filan yahay.

Haddaba, haddii aad wax badan ku ambatay hasaawaha dunida, oo wakhti iyo tamar kaaga lumeen, oo aadan Ilaah wakhti siinin, ayaan kuu sheegayaa inay tahay wakhtigii aad toobadkeeni lahayd maanta. Jooji inaad iska dhigto sida mid ku koraya rumaysadka adigoon koraynin, ee Ilaah u soo laabo, oo sare u qaad koboca Iimaankaaga.

Taasina waa wixii rasuul Butros dadka baray oo ah inay ku koraan rmaysadka ama iimaanka. Ha iska dhigin sida mid ku koraya rumaysadka, balse si rasmi ah u qaado go'aan aad Masiixa ku raacayso. Micna la'aan wakhti yuusan kaaga lumin, oo dib ha u noqon. Rajadaydu waxay tahay inaad rumaysad weli leedahay, balse aad dib u cusboonaysiiso mar kale Xiriirka Sayidka iyo koritaanka aqoonta Ilaah.

Haddii caqabadi kaa haysato fahamka rumaysadka Masiixa, jawaab waafi ah raadso. Ilaah ayaa jawaab u haya garaadkeenna, oo xigmad ku shubaya e.

Haddaba, sida aad nimcada ugu kori karto waa adiga oo cafiya dadka oo ay ku jiraan cadowgaaga, oo aad ku korto nimcada. Qof waliba caqabad baa ka haystasa in Iimaankoodu nuxuuso xiliyada qaar ee nolosha. Balse Ruuxa Qoduuska ah ayaa dib u kicinaya Iimaanka ee u soo laaba Ciise Masiix oo qiimee inta korriinkaagu noqonayo, ma 10 sano mise 20 sano, mise weligaa ayaad la soconaysaa Ilaah? Isweydii.

Waxaan Ilaah idiinka baryayaa idinka oo dhan inaad **"...ku kortaan nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix." Aamiin**

SONG: HAYE AAN AMMAANNO

Waxaa haddaba intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe saacadahan oo kale isla idaacaddan. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan Telephone number 0707032060. Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Waxaa kaloo aad isla barnaamijkan ka daalacan kartaa websitekayaga, waxaana weeye isna **www.twr360.org.** Farriinta waxaad ka soo hormarinaysaa Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah **0707032060**